

Khafiifinta culayska dhaqaalaha ee qoysaska caruurta aanay dhalin korsada

Juun 05, 2024 [Weydiimaha saxaafadda](#)

Dowladda Alberta waxay \$22 milyan muddo saddex sanno ah ku maalgalinaysaa si ay uga caawiso korinta, daryeelka qaraabada iyo daryeel bixiyeyaasha kale sidii ay u daryeeli lahaayeen dadka da'yarta ah ee kujira daryeelka dowladda.

Waalidiinta caruurta korsada iyo daryeelka qaraabanimada ah waxay muhiim u yihiin caawinta sidii dadka yaryar ee kujira daryeelka dowladdu ugu xirnaan lahaayeen walaalahood, dhaqankooda iyo bulshadoodaba, laakiin se qiimaha maciishadda oo sii kordhaya ayaa ka dhigaya inay wajahaan cadaadis dhaqaale oo ka haysta daboolista waxyaabaha lagama maarmaanka u ah noloshooda maalinlaha ah sida cuntada iyo dharka.

Si nolosha looga dhigo mid u qiima jaban daryeel bixiyeyaasha caruurta korsada iyo kuwa qaraabada ah, loogana jawaabo u qareemidooda xooggan, Alberta waxay diyaarinaysaa qiimeyaal kala duwan oo loogu tala galay daryeel bixiyeyaasha, kuwaas oo dhaqan galaya Juun 1. Arintan waxaa u faa'iidaynaysaa ku dhawaad 7,000 oo daryeel bixiye oo gobolka oo dhan ah iyo 10,000 oo caruur, dhalinyaro iyo dad meel dhexaad ah oo ay daryeel siiyaan iyo xaqiijinta inay sii wadi karaan bixinta guryo wanaagsan oo la isku hubo oo loogu tala galay caruurta iyo dhalinyarada nugul ee u baahan meel ammaan ah oo ay joogaan. Qoysaska korsada ama noqda mas'uuliyiinta gaarka ah ee caruurta kujirta daryeelka dowladda waxaa sidoo kale si wanaagsan u saamayn doona isbadaladaan.

“Daryeel bixiyeyaasha xananaada iyo kuwa qaraabada ah waxay qalbigooda iyo guryahooda u furaan sidii ay dadka yaryar u siin lahaayeen xiriirka iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay u koraan una guulaystaan. Malagalintanu waxay ka dhigantahay in qoysaska daryeel bixiyeyaasha ah aysan ka welwelin dhaqaalahooda oo ay diiradda saaraan waxa wanaagsan ee ay qaban karaan: oo ah inay caruurta iyo dhalinyarada siiyaan aasaas xooggan oo mustaqbalkooda anfaca.”

Searle Turton, Wasiirka Adeegyada Carruurta iyo Qoyska

Daryeel bixiyeyaasha kumeelgaraka ah iyo kuwa joogtada ah waxay heleen koror 4.2 boqolkiiba ah Juun dhexdeeda taasoo loogu tala galay qiimaha dayactirka, kharashka xirfadda, iyo sidoo kale haynta caruurta iyo gargaarka.

Kororkan wuxuu waafqsanyahay kororada kale ee barnaamijyada dowladda, oo ay ka mid yihiin Dheefta Caruurta iyo Qoyska ee Alberta (Alberta Child and Family Benefit), Dakhliga La hubo ee Dadka sida Daran Curyaanka u ah (Assured Income for the Severely Handicapped, AISH), Kaalmada dakhliga, iyo Dheefta Dadka da'da ah ee Alberta (Alberta Seniors Benefit).

Maalgalintan cusub waxay qayb ka tahay in ka badan \$23.6 milyan oo ah kaalmo cusub iyo talaabooyin xasilin oo loogu tala galay daryeel bixiyeyaasha xananaada iyo dadka yaryar ee kujira daryeelka waxaana la shaaciyay xagaagii 2023, waxaana kujira caymiska la talinta, meelmarinta barnaamijka U dirista Xananada Daryeel bixiyaha (Refer-a-Foster Caregiver), iyo kordhinta xirfadda maalinlaha ah iyo qiimeyaasha gaarka ah ee loogu tala galay daryeel bixiyeyaasha kujira ka qaybqaadashada Barnaamijka Ka korista Caruurnimada ee Qaangaarka (ilaa da'da 22).

Maalgalintu waxay sidoo kale qayb ka tahay kaalmooyin korsasho oo cusub oo lagu dhawaaqay dayrtii 2023 si korsashada looga dhigo mid u qiime jaban qoysaska Alberta. Taageerooyinkan waxaa kamid ah maalgashi \$4 milyan sannad walba muddo saddex sanno ah oo lagu samaynayo canshuur dhaaf dheeri ah, kabista si ay gacan uga gaysato daboolista kharashaadka hay'adaha liisanka u haysta caruur korsashada, iyo kordhinta caymiska caafimaadka ee caruurta lagu korsado Alberta.

Xaqiiqooyin Muhiim ah

- Hadda waxaa jira 1,477 daryeel bixiye oo caruurta la korsado ka shaqeeya, 2,313 daryeel bixiyeyaasha qaraabada ah iyo 3,013 qoysaska bixiya guryaha rasmiga ah ee ku bixiya mas'uuliyadda gaarka ah ama korsashada.

Wararka la xiriira

- [Alberta waxay daah rogtay codsashada kabka caruur korsashada](#) (Diisambar. 19, 2023)
- [Ayada oo kordhinaysa kaalmooyinka daryeel bixiyeyaasha caruurta la korsado](#) (Oktoobar. 24, 2023)
- [Ka dhigaysa caruur korsashada mid qiimo jaban](#) (Maarso 22, 2023)
- [Ololaha iftiiminta baahiyaha waalidiinta caruurta korsada](#) (Febraayo. 3, 2023)

Macluumaadka la xidhiidha

- [Noqo waalid ilma xanaaneeya](#)
- [Korsashada](#)

Warbaahinta kala duwan

- [Daawo war saxaafadeedka](#)

Su'aalaha warbaahinta

[Ashli Barrett](#)

587-545-8821

Xoghayaha Saxaafada, Adeegyada Carruurta iyo Qoyska